SOMALISKA

Ku soo-dhowoow

Carruur iyo waxbarasho

Skellefteå kommun

Degmada Skellefteå

Degmada Skellefteå waxay ku taalla waqooyiga dalka Swiidhan dhinaca xeebta Norrland. Degmada waxaa qiyaastii ku nool 72 000 qof. Degmada waxaa ku nool dadyoow ka kala yimi qiyaastii 70 dalal oo kala duwan. Degmada waxaa lagu tegi karaa iyadoo la adeegsado gaadiid, sida baabuur, bas, tareen ama dayuurad. In Stockholm loo duulo waxay u qaadataa hal saac. Qofka muddo dheer degmada Skellefteå ku noolaa iyo qofka dhowaan u soo guuray, waxay degmada ka heli karaan fursado badan.

Wax dheeraad ah ka akhriso boggeenna
Haddii aad dooneysid in aad wax dheeraad ah ka akhrisatid qeybaha kala duduwan ee xirmada yar ee macluumaadka, markaa waxaad bogga intarneetka ee degmada ka gashaa www.skelleftea.se/skola

Dugsiga xannaanada

Waa dhaqdhaqaaq wax barid ku salaysan oo loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxayso hal ilaa shan sano kuwaasoo waalidkoodu shaqeeyo, waxbarto, qaatay fasaxa waalidiinta ama uu yahay shaqa doon.
Dugsiga xannaanada waxaa ka shaqeeya macallimiin iyo kalkaaliyayaal carruureed, kuwaasoo shaqadooda tahay in ay carruurta waxbarashada ugu dhiirrigeliyaan si waafaqsan hadafka iyo khadadka la raaco ee leysugu sheegay manhajka waxbarashada ee dugsiga xannaanada, Lpfö 98/10 iyo Xeerka dugsiyada. Dugsiga xannaanadu waa tallaabta ugu horreysa ee hab-dhiska waxbarashada dalka Swiidhan.

Hawl wax barid la xiriirta oo nooc kale ah
Xannaanayn wax barid la xiriirta ayaa si beddel ahaan ah loo siinayaa meelo gaar ah dugsiga xannaanada ama kan xilliga firaaqada beddelkooda. Xannaanayn wax barid ku salaysan waa hawl ay shaqaaluhu carruurta kula xannaaneeyaan guryahooda (ku xannaaneynta guryaha qoysaska). Xannaanayn wax barid ku salaysan waxaa kaloo lagu qaban karaa goob u gaar ah. Qorshaha waxbarashada ku saabsan saldhigga heybadda ee dugsiga xannaanadda wuxuu xiriir la leeyahay. Manhajka dugsiga xannaanadu waa hagaha hawsha shaqada. Degmada Skellefteå waxay adeeg xannaano waqtiyada shaqada ee aan caadiga ahayn ku bixineysaa seddax ka mid ah dugsiyada xannaanada Skellefteå ee iminka jira. Adeeg xannaano oo saacadaha shaqada ee aan caadiga ahayn ah, waxaa codsan kara waalidka leh waqtiyo shaqo oo fiidadka iyo habeennada ah inta u dhexeysa saacadaha: 19.00–06.00 iyo wiig-endiyada.

Dugsi guud oo xannaano
Carruurtu waxay laga billaabo xilli dugsiyeedka deyrta ee sannadka ay seddax sano buuxinayaan xaq u leeyihiin dugsi guud oo xannaano. Laga billaabo kowda Sebteembar ee isla sannadka, dugsiga guud ee xannaanadu waa lacag la'aan. Dugsiga guud ee xannaanadu wuxuu ka koobanyahay 525 saacadood sannadkiiba.

Degmada Skellefteå waxay taasi ka koobantahay 15 saacadood usbuuciiba oo adeeg xannaano oo jiro ah. Dugsiga xannaanadu wuxuu caadi ahaan raacayaa waqtiyada sannad dugsiyeedka dugsiga. Taasoo loola jeedo in la joojinayo waqtiyada fasaxyada ah (fasax cidda masiixiga, fasax ciidda isboortiga, fasaxa dhimashadii masiixa iyo fasaxa xagaaga).

In boos la codsado
Waalidka canuggu laga billaabo hal sano jir wuxuu boos ka codsan karyaa dugsiga xannaanada ama adeeg kale oo xannaano oo la xiriira waxbarid inta loo baahanyahay iyadoo la eegayo shaqada ama waxbarashada ama in uu canuggu baahi gooni ah u qabo iyadoo ay teeda kale sabab u tahay xaaladda qoysku. Waaliddiinta shaqo-doonka ah ama u qaatay fasaxa waalidka si waafaqsan xeerka fasaxa waalidka ee loogu tala galay daryeelka carruurta kale, waxay laga billaabo marka uu canuggu sannad buuxiyo boos ka codsan karaan dugsiga xannaannada ama dhaqdhaqaaq wax barid ku salaysan oo nooc kale ah, ugu yaraan saddex saacadood maalintiiba ama shan iyo toban saacadood todobaadkii.

Dowladda hoose degmada Skellefteå waxay kuu damaanad qaadaysaa boos ka helid dugsiga xannaannada ama dhaqdhaqaaq wax barid ku salaysan oo nooc kale ah, waa haddii codsiga la helo saddex bilood kahor taariikhda ku meeleynta. Waqtiga loo codsaday meeleyntu waxay noqoneysaa taariikhda billaabidda, macnaha taariikhda uu canuggu ugu dambeyn billaabayo la qabsashada dugsiga xannaanada ama dhaqdhaqaaq wax barid ku salaysan oo nooc kale ah. Ogaw in aad ku xisaabtameysid ku dhawaad toban maalmood oo shaqo (oo loogu tala galay la qabsashada canugga) in ay ku jira waqtiga loo codsaday meeleynta inta aysan shaqada/waxbarashu billaaban.

Iyadoo la adeegsanayo adeegga elekteroonigga ah ayaa dugsiga xannaannada ama goobaha xilliga firaaqada boos laga codsadaa foomka "Boos ka codso dugsiga xannaannada, dhaqdhaqaaqa wax barid ku salaysan oo nooc kale ah ama goobaha xilliga firaaqada". Si loo isticmaalo adeegga elekteroonigga ah waxaa loo baahanyahay aqoonsi elekteroonik ah.

Waxaad xitaa foomka ka soo qaadan kartaa ama ka dalban kartaa adeegga macaamiisha ee degmada, taleefan 0910-73 50 00. Saxiixa labada waalid ayaa loo baahanyahay marka laga reebo waalidka kaligiis daryeelka iska leh. Foomka waxaa loo dirayaa: Skellefteå kommun, Trädgårdsgatan 6, 931 85 Skellefteå ama waxaa loo geynayaa Adeegga macaamiisha, Stadshuset. Wax dheeraad ah akhriso www.skelleftea.se/minasidor

Boos iska celin
Boos iska celin ku aaddan dugsi xannaano ama adeeg kale oo waxbarid la xiriira waa in uu dhacaa ugu yaraan laba bilood ka hor inta uusan canuggu joojin. Marka uu canuggu billaabayo fasalka dugsiga xannaanada wuxuu waalidku u baahanyahay in uu celiyo booska dugsiga xannaanada ama adeegga kale ee

waxbaridda la xiriira haddii boos laga doonayo guriga xilliga firaaqada, taasi waxay u dhaceysaa si ootumaatik ah. Boos iska celinta waxaa lagu sameynayaa adeegga elekteroonigga ah ee dugsiga xannaanada, guriga xilliga firaaqada ama foomka "Boos iska celin ku aaddan dugsi xannaano, adeeg kale oo waxbarid la xiriira ama guri xilli firaaqo". Si loo isticmaalo adeegga elekteroonigga ah waxaa loo baahanyahay aqoonsi elekteroonik ah. Foomka waxaad kaloo ka soo qaadan kartaa ama dalban kartaa xafiiska dowladda hoose Adeeggiisa macaamiisha, taleefan: 0910-73 50 00. Saxiixa labada waalid ayaa loo baahanyahay marka laga reebo waalidka kaligiis daryeelka iska leh. Foomka waxaa loo dirayaa: Skellefteå kommun, Trädgårdsgatan 6 931 85 Skellefteå ama waxaa loo geynayaa adeegga macaamiisha, Stadshuset.

Kharashaadka

Degmada Skellefteå waxay ku camal fashaa sicir goyn ugu sarreysa oo laba heer ah. In la qaato boos dugsi xannaano ama adeeg kale oo waxbarid la xiriira waxay ka dhigantahay in booska lacag laguugula soo dallacanayo laba iyo toban bilood oo sannadki ah. Waqti la qabsi lacag la'aan ah ayaa jira intii 10 maalmood oo shaqo ah, markaas ka dib waxaa leyska qaadayaa kharash meel leysla dhigay oo joogto ah. Lacagta khidmada ah ee dugsiga xannaanada iyo adeegyada kale ee la xiriira waxbaridda waxaa lagu saleynayaa:

- dakhliga qoyska ee bishii jumlo ahaan
- waqtiyada jadwalka ee canugga ama carruurta
- carruurta lagu meeleeyay xannaano la xiriirta waxbarid – qeybta macaashka

Wax dheeraad ah ka akhriso www.skelleftea.se/skola

Maqnaasho iyo fasax

Cudur, fasaxa shaqada ee xagaaga, fasaxa ciidda masiixiga ah, fasaxa isbootiga, fasaxa dhimashadii nabi ciise iyo fasaxyada kale waxaa si toos ah loogu wargelinayaa dugsiga xannaanada ama adeegga kale ee waxbaridda la xiriira. Joogitaan yaraada iyadoo lagu jiro fasax caadi ah ma saameynayo lacagta khidmada ah. Carruurtu xaq uma laha in ay joogaan dugsiga xannaanada ama adeeg kale oo waxbarid la xiriira haddii uu waalidku fasax shaqo ama fasax kale ku jiro (tusaale ahaan fasax xilli shaqo oo la beddelan karo, fasax megsasho ah, fasax waxbarasho).

Guddiga dugsiga xannaanada

Dugsiga xannaanada waxaa ka jira guddi dugsi xannaano halkaas oo waaliddiinta iyo shaqaalaha labadaba lagu metelo. Haddii aad doonayso inaad saamayn ku yeelato la xiriir madaxa dugsiga xannaanadda.

Dugsi hoose-dhexe

Fasalka dugsiga xannaanada
Laga billaabo xilliga deyrta marka uu canuggaagu lix sano buuxinayo wuxuu canuggu billaabi karyaa fasalka dugsiga xannaanada. Fasalka dugsiga xannaanadu waa lacag la'aan wuxuuna ka koobanyahay ilaa iyo 20 saacadood usbuuciiba.

Dugsi hoose-dhexe
Bisha Agoosto ee sannadka uu canuggu buuxinayo 7 jir waxaa billaabanaya fasalka ugu horreeya ee dugsigeenna hoose-dhexe ee 9-sanadlaha ah. Dugsi dhigashadu waa waajib, taasoo ka dhigan in uu jiro sharci dhahaya in dhammaan carruurta iyo dhallinyarada Swiidhan jooga ay dugsi dhigtaan. Haddii aad doonayso in ubadkaaga u dhigto fasalka markii u 6 sano buuxsado, waa inaad ka codsata agaasimaha dugsiga aad doonayso in boos laga siiyo. Dugsi-dhigashada waa lacag la'aan. Buugaagta waxbarashada iyo qadadu waa lacag la'aan.

Dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhiman
Ardayga xaqa u leh in wax loogu dhigo dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhiman wuxuu joogi karyaa dugsigiisa hooyo, wuxuuna wax u dhigan karyaa si waafaqsan manhajka waxbarashada ee dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhiman. Ardaygu wuxuu xitaa dhigan karyaa dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhiman ee aagga.

Guri xilli firaaqo
Waaliddiinta carruurtu laga billaabo fasalka dugsiga xannaanada waxay boos ka codsan karaan guriga xilliga firaaqada hadba inta loo baahanyahay iyadoo la eegayo shaqada ama waxbarashada ama haddii uu ardaygu baahi u gooni ah oo ku saleysan xaaladda kale ee qoyska uu qabo. Waaliddiin ah shaqo raadis ama fasax waalid ugu jira si waafaqsan xeerka fasaxa waalidka ee loogu tala galay daryeelka canug kale, waxay seddax maalin usbuucii boos ka codsan karaan guriga xilliga firaaqada, laga billaabo marka dugsigu uu maalintii dhammaado ilaa iyo 15.30:ka. Taasi waxay khuseysaa ardayda laga billaabo fasalka dugsiga xannaanada ilaa iyo fasalka 3.

Boos iska celinta guriga xilliga firaaqada waxaa la sameynayaa laba bilood ka hor inta uusan ardaygu joojinnin. Lacagta khidmada waa leysku soo dallacayaa inta lagu jiro xilliga boos iska celinta. Haddii boos iska celinta guriga xilliga firaaqada loola jeedo waqtiga Juun-Agoosto, mas'uuliyadda kharash bixinta lagama cafinayo waalidka haddii uu ardaygu u soo laabanayo guriga xilliga firaaqada bisha oktoobar ka hor ee isla sannadkaas. Dib kharash isugu soo dallacasho ku aaddan booska guriga xilliga firaaqada ee xagaaga la celiyay ayaa dhaceysa haddii ardaygu uu dib deyrta ugu soo laabanayo.

Boos codsasho/iska celin waxaa lagu sameynayaa foom ama adeegga elekteroonigga ah ee dugsiga xannaanada, guriga xilliga firaaqada. Si loo isticmaalo adeegga elekteroonigga ah waxaa loo baahanyahay aqoonsi elekteroonik ah.

Horuumarka ardayga
Ugu yaraan hal mar xilli dugsiyeedkiiba waxay ardayga, waaliddiinta ardayga iyo macallinku yeelanayaan wadahadal horuumarineed. Wadahadalku wuxuu ku saabsanaanayaa horuumarka aqooneed iyo horuumarka bulshanimo ee ardayga marka loo eego manhajka waxbarashada, qorshooyinka waxbarashada iyo aqoonta leysaga baahanyahay. Dugsiga hoose-dhexe wuxuu macallinku sannad dugsiyeedkiiba hal mar soo saarayaa qorshe horuumarineed oo qoraal ah oo ardayda u gaar ah fasallada aan shahaaddo la bixineynin. Qorshe nuucaan waxaa xitaa hal mar sannad dugsiyeedkiiba loo dejinayaa ardayda fasallada 6-9 ee dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhimman mararka aan shahaaddo la bixineynin.

Shahaaddo
Ardaydu waxay maanta qaataan shahaaddo fasallada 6–9. Waxaa shahaado leysi siinayaa xilli dugsiyeed kasta, fasalka 9:aadne waxaa xilliga guga leysi siinayaa shahaaddo kama dambeys ah. Dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhiman waxaa maaddooyinka oo dhan shahaaddo leysku siiyaa fasallada 6-9 haddii arday ama waaliddiinta ardaygu ay taas dalbadaan.

Guddi dugsi
Dugsiyada waxaa ka jira guddiyo dugsi halkaas oo waaliddiinta iyo shaqaalaha lagu metelo labadaba. Haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid oo aad saamayn yeelato la xiriir maamulaha dugsiga.

Maqnaasho iyo fasax
Haddii canuggaagu uu xanuunsado waxaad si elekteroonik ah ugu soo wargelineysaa dugsiga hoose-dhexe. Waxaad sidoo kale wici kartaa adeegga macaamiisha ee degmada. Soo sheegidda xanuunka waxaa la sameynayaa inta maalinta dugsigu aysan billaaban.

Wax ay dhammaan meelaha wax lagu qabto wada wadaagaan

Ceymis
Dhammaan carruurta dhigata dugsiga xannaanada, xannaanada waxbaridda la xiriirta, guriga xilli firaaqada iyo dugsigu waxay ku jiraan ceymis. Ceymisku wuxuu xitaa khuseeyaa xilliga firaaqada. Wax dheeraad ah ka akhriso www.skelleftea.se/forsakringar

Af-hooyo
Dugsiga xannaanada iyo dugsiga waxay carruurta iyo ardaydu fursad u helayaan in ay horuumariyaan luqaddooda hooyo iyo luqadda swiidhishka. Ardayda dugsiga dhigata waxay xitaa xaq u leeyihiin in ay luqad labaad ahaan swiidhishka u dhigtaan.

Caafimaadka carruurta- iyo ardayda
Caafimaadka caruurta- iyo ardaydu waxay carruurta dugsiga xannaanada, fasalka dugsiga xannaanada, guriga xilliga firaaqada iyo ardayda fasallada 1-9 ula shaqeeyaan si caafimaad xoojin iyo caafimaad darro ka hor tegid ah. Waxay xitaa gacan ka geysan karaan horuumarka aqooneed ee caruurta iyo ardayda.

AGOOSTO 2017

www.skelleftea.se